Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
*Xafiiska Madaxweynaha*

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
***Office of the President***

**SHARCI LR. 23** **Taariikh: 20/02/2020**
**ANSIXINTA SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA EE HEER FEDERAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Ref./GSH259/B-10/20 taariikh 20/02/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Doorashooyinka Qaran ee heer Federaal

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Doorashooyinka heer Federaal.

dawan Africa

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 20/02/2020**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/051/2020
TAARIIKH 24/03/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

الجمهورية الفيدرالية الصومالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: GSH/259/B-10/20 :الرقم

Mogadishu- Feb 20, 2020: التاريخ

Ku: Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya
Muqdishu

---

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare
Muqdishu

---

Og: Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdishu

---

Og: Guddiga KMG ee Xeerka Doorashadda ee Golaha Shacabka
Muqdishu

---

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda
Muqdishu

---

Og: Hantidhawrka Qaranka
Muqdishu

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
Muqdishu

---

√Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka
Muqdishu

---

**Ujeedo: H/Sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka ee Heer Faderaal**

**Mudane Madaxweyne,**

Sida aad la socoto, **H/Sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka ee Heer Faderaal** ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbiyey Xafiiska R/Wasaaraha XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talagaly marsiiyay Guddiga KMG ee Xeerka Doorashadda ee Golaha Shacabka; iyadoo xildhibaanada Golaha Shacabka ay ka doodeen. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay H/Sharciyeedkan Kalfadhiga 6-aad



dawan Africa

Kulankiisa 32aad taariikhdu markay ahayd **19/2/2020,** iayada ooy xaadir yihiin 144 Xildhibaan codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 141;** **Diiday: 3;** **Aamus: 0;**

Aqalka Sare ee Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya, waxuu Golaha Shacabka u soo gudbiyey Sharcigan oo Ansax ah, oon wax nuxur ah aan laga badalin nuqulkii Golaha Shacabku horey ugu direy Aqalka sare. Waxuu Aqalka Sare ugu soo gudbiyey Golaha Shacabka warqadda tirsigeedu yahay XG/400/B-10/20 kuna taariikhaysan 12/02/2020.

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (f) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka, kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

**Naga Guddooma Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan**

**M.ne Maxmaed Mursal Sheikh Abdirahmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS**

dawan Africa

**Tell: +252 6 1 2224442 / +252-615577472**
**E-mail.** speaker@parliament.gov.so mmursal44@hotmail.com

# H/SH DOORASHOOYINKA QARANKA EE HEER FADERAAL

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 144 : Oggol: 141; Diiday: 3; Ka aamustay: 0; | |
| Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdirahman | Taariikh: Feb 19, 2020 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey | Taariikh: Feb 19, 2020 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux | Taariikh: Feb 19, 2020 |

dawan Africa

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Taariikh: 12 / 2 / 2020 التاريخ

Tix: XG/400/B-10/20

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Guddiga Ku-meel-gaarka ee Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Dooroshooyinka Qaranka ee Heer Federaal)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-10/KF6/13/2020** kuna taariikheysan **08 Febraayo 2020** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Dooroshooyinka Qaranka ee Heer Federaal:**

dawan Africa

- Waxaa soo xaadiray: **35 Senatar.**
- Waxaa codeeyay: **34 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **28 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **6 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

# ANSIXINTA SHARCIGA DOOROSHOOYINKA QARANKA EE HEER FEDERAAL

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 34 | 28 | 0 | 6 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 08da Febraayo 2020 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Abshir Maxamed Axmed | Taariikh: 08da Febraayo 2020 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Mowliid Xuseen Guhaad | Taariikh: 08da Febraayo 2020 |

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

dawan Africa

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA
# DOOROSHOOYINKA QARANKA
# EE HEER FEDERAAL

Muqdisho,
08da Febraayo 2020

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

**Tix**: GAS/B-10/KF6/13/2020 **Taariikh**: 08 Feb. 2020

Kalfadhiga 6$^{aad}$

Kulankiisa 35$^{aad}$

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY KANA DOODAY:**

**Sharciga Dooroshooyinka Qaranka Ee Heer Federaal** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna dib-u-eegay soona ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **01 Jannaayo 2020**; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.71$^{aad}$**, **Qod.82$^{aad}$** iyo **Qod.83$^{aad}$** ee Dastuurka KMG ah **Qod.49$^{aad}$** iyo **Qod.50$^{aad}$** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

dawan Africa

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61$^{aad}$** (1) (3) ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in **Sharciga Dooroshooyinka Qaranka Ee Heer Federaal** loo ansixiyo sida uu u soo diyaariyay Guddiga KMG ee Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo **Sharciga Dooroshooyinka Qaranka Ee Heer Federaal**

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **6$^{aad}$**, kulankiisa **35$^{aad}$**, oo ay soo xaadireen **35 Senatar** (Soddon iyo shan Senator).

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay **Sharciga Dooroshooyinka Qaranka Ee Heer Federaal** isaga oo wax-ka-beddel ku sameeyay.

### Qod.2aad

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

dawan
Africa

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

الجمهورية الفيدرالية الصومالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: 234/12/01/B-10/19 :الرقم

**Taariikh:** December 31, 2019: تاريخ

**Ku:** Guddoomiyaha Aqalka Sare

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal**

Mudane Guddoomiye,

Sida aad la socotaan, Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal ee halkaan ku lifaaqan waxaa soo gudbisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga kmg ee diyaarinta Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Golaha Shacabka ayadoo xildhibaanada ay kaga doodeen akhrinta 2aad. Ugu dambayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal Kalfadhiga 6aad Kulankiisa 27aad taariikhdu markay ahayd **28kii Diseembar 2019** codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 171;** **Diiday: 5;** **Ka aamustay: 2**

Mudane Guddoomiye waxaa halkan ku lifaaqan nuqulka Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal uu Golaha Shacabku ansixiyay, iyo dukumentiyo sharaxaya heerarkii kala duwanaa ee uu soo maray iyo wax-ka-beddaladii lagu sameeyay sharcigan, si aad oga gudataan waajibkiina Dastuuriga ah.

Naga guddooma salaan qiimo iyo qaddarin xanbaarsan

**M.ne Maxmaed Mursal Sheikh Abdirahmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

**Og:** Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Og:** Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

**Og:** Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

**Og:** Guddiga kmg ee Diyaarinta Sharciga Doorashooyinka Qarank

**Og:** Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

**Og:** Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka

Tell: +252-612224442 / +252-615577472
E-mail. speaker@parliament.gov.so mmursal44@hotmail.com

dawan Africa

# SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA EE HEER FEDERAAL

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 178: Oggol: 171; Diiday: 5; Ka aamustay: 2; | |
| Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdiraxmaan | Taariikh: December 31, 2019 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiixa: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: December 31, 2019 |

dawan Africa

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiix: M.ne Cabdikariim Xaaji Cabdi Buux | Taariikh: December 31, 2019 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA EE HEER FEDERAAL

dawan Africa

**Tusmo:**


CUTUBKA 1-aad: QODOBBO GUUD ... 1

Qodobka 1-aad: Magaca Sharciga ... 1

Qodobka 2-aad: Eray-bixin ... 1

Qodobka 3-aad: Ujeeddada Sharciga ... 2

Qodobka 4-aad: Mabaadii'da Aasaasiga Ah ... 2

Qodobka 5-aad: Baaxadda Sharcigan ... 3

CUTUBKA 2-aad: MAAMULKA DOORASHOOYINKA ... 3

Qodobka 6-aad: Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka ... 3

Qodobka 7-aad: Awoodaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka ... 3

Qodobka 8-aad: Shaqaalaha Xafiisyada Doorashooyinka ... 4

Qodobka 9-aad: Xasaanadda Xubnaha GMDQ ... 4

Qodobka 10-aad: Nidaamka Doorashooyinka ... 5

Qodobka 11-aad: Shuruudaha iyo Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ... 5

Qodobka 12-aad: Doorashooyinka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ... 6

Qodobka 13-aad: Cayimaadda Taariikhda Doorashooyinka la qabanayo ... 6

CUTUBKA 3-aad: DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA ... 7

Qodobka 14-aad: Diiwaan-gelinta Codbixiyaha ... 7

Qodobka 15-aad: Shuruudaha diiwaan-gelinta ... 7

Qodobka 16-aad: Fulinta Diiwaan-gelinta ... 7

Qodobka 17-aad: Bilawga Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha ... 8

Qodobka 18-aad: Xogta codbixiyaha ... 8

Qodobka 19-aad: Kaarka Codbixinta ... 9

Qodobka 20-aad: Dhawrista Xogta Codbixiyaha ... 9

Qodobka 21-aad: Kaalinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ... 9

Qodobka 22-aad: Soo-saarista Liiska codbixiyeyaasha ... 10

CUTUBKA 4-aad: MURASHAXIINTA IYO OLOLAHA DOORASHOOYINKA EE XISBIYADA ... 10

Qodobka 23-aad: Xisbiyada Ka-qeyb-galaya Doorashooyinka ... 10

Qodobka 24-aad: Murashaxiiinta Doorashooyinka ... 10

Qodobka 25-aad: Shuruudaha Murashaxiinta ... 10

Qodobka 26-aad: Soo-gudbinta Magacyada Murashaxiinta ... 11

Qodobka 27-aad: Hubinta iyo Kala Saarista Murrashaxiinta ... 11

Qodobka 28-aad: Astaamaha iyo Xuquuqda Xisbiyada iyo Murashaxiinta ... 12

Qodobka 29-aad: Ololaha Doorashooyinka ........ 12
Qodobka 30-aad: Waxyaabaha ka Reebban Ololaha ........ 13
Qodobka 31-aad: Warbaahinta iyo Doorashooyinka ........ 13
CUTUBKA 5-aad: DIYAAR-GAROWGA DOORASHOOYINKA IYO CODBIXINTA ........ 14
Qodobka 32-aad: Hawl-galka ........ 14
Qodobka 33-aad: Diyaarinta Agabka Doorashooyinka ........ 14
Qodobka 34-aad: Waraaqaha Codbixinta ........ 14
Qodobka 35-aad: Agabka loo baahanyahay ........ 14
Qodobka 36-aad: Korjoogtaynta Doorashada ........ 15
Qodobka 37-aad: Diyaar-garawga Codbixinta ........ 15
Qodobka 38-aad: Waajibaadka Maamulaha Goobta Doorashada ........ 16
Qodobka 39-aad: Nidaamka Goobta Codbixinta ........ 16
Qodobka 40-aad: Goobta Codbixinta dhexdeeda ........ 17
Qodobka 41-aad: Codbixinta ........ 17
Qodobka 42-aad: Muddada Codbixinta ........ 18
Qodobka 43-aad: Cabashooyinka Goobta ........ 18
CUTUBKA 6-aad: TIRINTA CODADKA IYO NATIIJADA DOORASHOOYINKA ........ 18
Qodobka 44-aad: Isu Diyaarinta Tirinta Codadka ........ 18
Qodobka 45-aad: Bilaabidda Tirinta Codadka ........ 19
Qodobka 46-aad: Soo-gabagabeynta Tirinta Codadka ........ 19
Qodobka 47-aad: Codadka Xumaaday ........ 20
Qodobka 48-aad: Gudbinta Natiijada Goobta ........ 20
Qodobka 49-aad: Qaabka Xisbiyadu ugu kala Guuleysanayaan Kuraasta ........ 21
Qodobka 50-aad: Dacwadaha la xiriira Doorashooyinka ........ 21
CUTUBKA 7-aad: QODOBBO QUBANE AH ........ 22
Qodobka 51-aad: Dembiyada iyo Ciqaabaha ka Dhalanaya Jabinta Sharcigan ........ 22
Qodobka 52-aad: Dhawrista Sharciga ........ 23
Qodobka 53-aad: Dib-u-dhaca Doorashooyinka ........ 23
Qodobka 54-aad: Sugidda Amniga ........ 23
Qodobka 55-aad: Xaaladaha Anshax Marinta ........ 23
Qodobka 56-aad: Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaasha ........ 24
Qodobka 57-aad: Baabi'in ........ 24
Qodobka 58-aad: Dhaqan-galka Sharciga ........ 24

dawan Africa

## CUTUBKA 1-aad:
## QODOBBO GUUD
### Qodobka 1-aad:
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal"

### Qodobka 2-aad:
### Eray-bixin

Sharcigan gudihiisa haddii aan si kale loogu qeexin, ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha ku hor qoran:

1. Dastuur: waxaa loola jeedaa Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Qof: waxaa loola jeedaa bani'aadam caqli leh ama shakhsi sharcigu sameeyey (hay'ad leh shakhsiyad qaanuuneed);
3. Doorasho: waxaa loola jeedaa habka loogu guuleysto jago siyaasadeed oo loo tartamo;
4. Xisbi: waxaa loola jeedaa xisbi siyaasadeed oo si rasmi ah loo diiwaan-geliyay ama isbaheysi ay ku mideysan yihiin xisbiyo siyaasadeed oo si rasmi ah loo diiwaan-geliyay, iyadoo la raacayo Sharciga xisbiyada (Sharci Lr.19 ee 27kii Juun 2016);
5. Wakiil: waxaa loola jeedaa wakiillada xisbiyadu u soo dirsadaan la socodka xarumaha iyo goobaha ay ka dhaceyso diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo codeynta;
6. GMDQ: waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee lagu dhisay (Sharci Lr.4/2015) **;**
7. Goobaha codbixinta: waxaa loola jeedaa dhismo kasta, qeyb ka mid ah dhismo, guri ama goob xiran oo loogu talagalay in lagu qabto codbixinta inta ay socdaan hawlaha codbixinta;
8. Xarun Doorasho: waxaa loola jeedaa meesha laga maamulo goobaha codbixinta;
9. Cod-bixiye: waxaa loola jeedaa qof kasta ee buuxiya shuruudaha lagu xusay qodobbada sharcigan, kuna jira diiwaanka cod-bixiyaha;
10. Diiwaanka Cod-bixiyeyaasha: waxaa loola jeedaa buug, aalad ama qalab kasta oo lagu keydiyo xogta cod-bixiyeyayaasha sida ku cad sharcigan;
11. Warbaahinta: waxaa loola jeedaa nooc kasta oo ka mid ah qaababka warka laysu gaarsiiyo si guud oo qoraal, maqal ama muuqaal ah;
12. Xarunta Diiwaangalinta: Waxaa loola jeedaa goob ay ku yaallaan hal iyo wax kaban oo goob diiwaangalin ah iyo meesha muwaadiniinta soomaaliyeed aadayaan si ay isaga diiwaangaliyaan diiwaanka codbixiyaha;
13. Xeerka Anshaxa: Waa xeer uu soo saaro GMDQ si uu ugu maamulo tartatamayaasha doorashada inta lagu guda jiro hannaaka doorasho. Xeerka Anshaxa waxaa lagu dhaqayaa xisbiyada siyaasadeed, kor-joogeyaasha, warbaahinta, shaqaalaha maamulka doorashada.
14. Xeer-nidaamiyeyaal: Waa dukuminti sharci ah oo ka soo baxay GMDQ kaa soo sharxaya hannaanka kala duwan ee lagama maarmaanka u ah qabashada doorashada, tusaale, kuma koobna diiwaangalinta codbixiyaha, in la soo saaro liiska ku-meel-gaarka ah ee codbixyeyaasha, ruqsadsiinta wakiillada xisbi iyo kor-joogeyaasha; codbixinta, shax-u-samaynta codadka, cabashooyinka iyo racfaannada.
15. Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba: Waxaa loola jeedaa qabanqaabada iyo hannanka loo raacayo codaynta dadka xaqa u leh inay codeeyaan balse aan codayn karin kaalmo la'aan;
16. Goobta Diiwaangalinta: Waxaa loola jeedaa goob ama xarun loo asteeyey diiwaangalinta codbixiyeyaasha;

17. Kaarka Oggolaashaha: waxaa loogu talagalay korjoogeyaasha doorashada iyo wakiillada xisbiyada siyaasadeed waxaana ka muuqanaya xog lagu aqoonsanayo cidda uu u shaqeeyo ama uu matalo. Kaararka waa inay lahaadaan calaamad si fudud loogu ogaan karo cidda sidata;
18. Korjoogaha Doorashooyinka: waxaa loola jeedaa qof qaan gaaray oo ka socda hay'addo maxalli ah iyo kuwo caalami ah, warbaahinta maxalliga ah iyo kuwo shisheeye ee GMDQ u oggolaaday inay korjoogteeyaan doorashooyinka si waafaqsan sharcigaan iyo Xeer-nidaamiyaasha GMDQ;
19. Maalinta Doorashada: waxaa loola jeedaa muddo hal maalin oo lagu qabanayo doorashada ama codbixiyeyaashu ku codeynayaan si waafaqsan Sharcigan, Xeer-nidaamiyaasha GMDQ iyo shuruucda kale ee la xiriira;
20. Madaxwaynaha: Waxaa loola jeedaa Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya;
21. Murashax: waxaa loola jeedaa murashax u tartamaya Goleyaasha Baarlamaanka Fadaraalka iyo Madaxtinimada Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya kasoo ku tartamaya magaca xisbi siyaasadeed;
22. Muwaadiniinta: waxaa loola jeedaa qof kasta oo buuxiya shuruudaha ku qoran Dastuurka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya iyo shuruucda kale ee xeerinaya;
23. Habraacyada: Waa habraac faafaahsan oo lagu dhaqangalinayo hannaanka ku qoran Xeer-nidaamiyeyaasha ama Sharciga. Waxaa ka mid ah faahfaahinnada u qoran tallaabo-tallabo ee ku saabsan sida loogu diiwaangalinayo codbixiyeyaasha goobaha codbixinta, sida warqadaha loo tirinaayo, iyo sida foomamka loo wareejinaayo;
24. Deegaan-doorasho: waxaa loola jeedaa deegaan loo asteeyey in laga soo doorto hal kursi Baarlamaan**;**
25. Kursi: waxaa loola jeedaa xilka xubinnimo ee uu buuxinayo/buuxineyso xildhibaanka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

dawan Africa

**Qodobka 3-aad:**
**Ujeeddada Sharciga**

Ujeeddooyinka sharcigani waa;

1. In lagu maamulo doorashooyinka labada Aqal ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. In uu tilmaamo habraaca Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Dastuurka Federaalka;
3. In lagu hirgaliyo doorashooyin waqtiila ah qof-iyo-cod ah oo xor iyo xalaal ah toos ah codkuna yahay qarsoodi kana maran cabsi gelin, loona maamulay si madaxbannaan, dhexdhexaad ah, hufan, kuna saleysan habraac sharci oo dhaqan-gal ah.
4. In lagu qeexo oo laguna tilmaamo nidaamka doorasho ee dalka Soomaaliya.

**Qodobka 4-aad:**
**Mabaadii'da Aasaasiga Ah**

Qabashada iyo maamulka doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal iyo sharciga ku saabsan doorashooyinka waa inay hagaan mabaadii'da soosocda:

1. Inay noqdaan doorashooyin waqtiila ah qof iyo cod ah, loo siman yahay, una dhaca si xor ah, toos ah, codkuna yahay mid qarsoodi ah, lana ilaaliyo rabitaanka iyo kalsoonida codbxiyeyaasha si waafaqsan sharcigan, Dastuurka Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya,

heshiisyada caalamiga ee Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya qaybta ka tahay, xeer-nidaamiyaasha GMDQ iyo shuruucda kale ee doorashooyinka;
2. Codbixiyeyaashu waxay si siman xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada codkooda;
3. Muwaadin kasta ee u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto lana doorto iyadoo qofna lagu takoorin, qolo, midab, isir, dhaqan ama lahjad, Lab iyo Dheddig dhalasho, dadka qaba baahiyaha gaarka ah, fikir siyaasad, xirfad, heerka bulsho ama dhaqaale iyo wax kasta oo la halmaala.
4. In la dhowro qarsoonida iyo xorriyadda sir ahaanta dhiibashada codka. Ma jiro qof xaq u leh inuu ka hor istaago muwaadin inuu codkiisa dhiibto, ku qasbo qof inuu u codeeyo qaab gaar ah, kula xisaabtamo qof codkiisa ama waydiiyo qof codkiisa ama u sheego sababta uu ugu codayn waayey isaga oo aan raali ka ahayn;
5. Doorashooyinka tirada xubnaha Goleyaasha Federaalka waa inay ka turjumaan dhammaan isu dheellitirka qaybaha kala duwan ee bulshada.
6. Dhammaan xisbiyada siyaasadeed iyo murashaxiinta waxay xor u yihiin inay ololeeyaan, xayeeysiin doorasho ku samaystaan warbaahinta si waafaqsan shuruucda dalka.
7. Waxaa reebban in loo isticmaalo xaafiis dowladeed, hantida, ama shaqaalaha ka tirsan Dowladda Federaalka ama Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka arrimo lagu taageerayo xisbi siyaasadeed ama murashax doorasho.
8. Dhammaan xisbiyada siyaasadeed iyo murashaxiinta iyo hay'adaha ku shaqada leh doorashooyinka waxaa laga doonayaa inay xushmeeyaan shuruudaha qoondada Haweenka.

**Qodobka 5-aad:**
**Baaxadda Sharcigan**

1. Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan hawlaha maamulka doorashooyinka Heer Federaal ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Sharcigu wuxuu caddeynayaa hawsha maamulka doorashooyinka Heer Federaal, nidaamyada doorashooyinka, habraacyada maamulka doorashooyinka iyo hababka maareynta khilaafyada ka dhasha doorashooyinka.

dawan Africa

## CUTUBKA 2-aad:
## MAAMULKA DOORASHOOYINKA

**Qodobka 6-aad:**
**Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka**

GMDQ waa hay'adda u xilsaaran maamulka doorashooyinka heer Federaal si waafaqsan Qodobka 111G (2) (a) iyo (b) ee Dastuurka iyo Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannan ee Doorashooyinka Qaranka (Sharci Lr. 04 ee 2015).

**Qodobka 7-aad:**
**Awoodaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka**

1. Iyadoo aan waxba loo dhimayn awoodaha GMDQ ee ku xusan Dastuurka iyo Qodobka 14[aad] ee Sharciga dhismaha GMDQ (Sharci Lr. 04/2015), GMDQ wuxuu yeelanayaa awoodaha soo socda:
    a. In uu sameeyo daraasad ku saabsan sidii loo sameyn lahaa goobo doorasho oo ay codbixiyeyaashu codkooda ka dhiibtaan maalmaha doorashooyinka;

b. In uu muddeeyo wakhtiga doorashooyinka la qabanayo;
c. In uu cayimo tirada iyo goobaha cod-bixinta ee dalka;
d. In uu magacaabo, eryo, anshax-mariyo shaqaalaha xafiisyada kala duwan ee Doorashooyinka si waafaqsan sharciga lagu dhisay GMDQ iyo Xeerarka kale ee Xiriirka la leh.
e. In uu qorsheeyo dhaqaalaha iyo miisaaniyadda lagu maamulayo hawlaha doorashooyinka;
f. In uu ku dhawaaqo natiijooyinka doorashooyinka dalka.
g. In uu si joogto ah u kormeero goobaha kala duwan ee loo asteeyay in ay codbixintu ka dhacdo;
h. In uu xalliyo go'aanna ka gaaro cabashooyinka ka dhanka ah xafiisyadda hoos yimaada.
i. In ay u kormeeraan si kedis ah iyo si qorshaysanba goobaha doorashooyinka iyo meel kasta oo hawshoodu khuseysa.
j. In ay go'aan ka gaaraan murannada iyo cabashooyinka doorashooyinka ee ka soo gaara xafiisyada hoos yimaada Guddiga doorashooyinka.

2. In ay fuliyaan waajibaad kasta oo ay awood u siiyeen GMDQ sharciyada kale ee dalka ee dhaqan-galka ah.
3. Xarun iyo goob kasta ee codbixineed waxay yeelanaysaa oo ka hawl-galaya maamule, maamule ku-xigeen iyo xoghaye.

**Qodobka 8-aad:**

**Shaqaalaha Xafiisyada Doorashooyinka**

1. Shaqaalaha ku-meel gaarka ah iyo hawl-wadeenada ka hawl-galaya xafiisyada doorasho, waa in lagu wargeliyo mas'uuliyadda loo idmaday.
2. Madaxda ka hawlgasha xarumaha/goobaha doorashooyinka, waxaa lagu hor dhaarinayaa Xubno kamid ah GMDQ, dhaar fagaare ah, taasoo ah sidan "waxaan magaca Ilaahay ugu dhaaranayaa in aan hawsha doorashooyinka u guto si xilkasnimo iyo daacadnimo leh, kuna shaqaynayo caddaalad iyo si waafaqsan shuruucda Dalka"
3. Dadka ku jira xisbiyada, xubnaha ciidamada kala duwan, shaqaalaha Dowladda iyo cid kasta oo arrimo siyaasadeed si ugu lug leh, looma magacaabi karo in ay ka hawlgalaan xafiisyada doorashooyinka.
4. Hawl-wadeenada ka hawl-galaya xafiisyada doorashooyinka waxay shaqadoodu dhammaanaysaa marka ay dhammaato doorashadu oo natiijada lagu dhawaaqo, hase yeeshee GMDQ wuu u kordhin karaa muddada shaqada haddii loo baahdo.
5. Shaqaalaha iyo hawl-wadeenada ka hawl-galaya xafiisyada doorashooyinka waxay yeelanayaan gunnooyin waxaana qorsheynaya GMDQ, iyagoo ku saleynaya xilalka ay hawl-wadeennadu ku kala magacaaban yihiin.
6. Dhammaan shaqaalaha iyo hawl-wadeennada waxaa waajib ku ah dhawrista dhammaan shuruucda doorashooyinka waxayna saxiixayaan Xeerka hab-dhaqanka shaqaalaha iyo hawl-wadeenada doorashooyinka ee GMDQ diyaarinayo.

**Qodobka 9-aad:**

**Xasaanadda Xubnaha GMDQ**

1. Xubnaha GMDQ waxay leeyihiin xasaanad sida ku xusan Qodobka 17aad, Faqradaha (1) (2) ee Sharciga Dhisidda GMDQ, (Sharci Lr.4/2015.)

2. Waxaa reeban in xubnaha GMDQ iyo howlwadeennada laga qaado tallaabo baaritaan, waraysi dacwadeed, qabasho ama xiritaan ama tallaabo kale oo ciqaab la xiriirta, iyadoo aan oggolaansho looga helin Maxkamadda Sare ee Dalka. Haddii aan lagu helin ayagoo gacanta kula jira fal dambiyeed.

**Qodobka 10-aad:**
**Nidaamka Doorashooyinka**

1. Habka Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal wuxuu noqonayaa nidaamka metalaadda kuraasta Baarlaamanka ee aqlabiyadda ah (Majoritarian System) oo ku salaysan tartanka halkii kursiba gaarkiis loo dooranayo (Single Member Plurality "SMP"). Habkan oo loo yaqaan horreeyaa guuleysta (First Past The Post "FPTP") waxaa lagu kala baxayaa codka hal dheeriga ah ee tartanka kursi deegaanka.
2. Murashaxiinta xisbiyadu soo gudbinayaan waxay ku saleysan yihiin tirada kuraasta ee ku astaysan deegaan doorasho kursi kastaba gaarkiisa ah ee ay u tartamayaan Iyada oo xisbi walba soo sharaxanayo ugu yaraan 50% tirada  Guud ee kuraasta labada Aqal.

**Qodobka 11-aad:**
**Shuruudaha iyo Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

1. Madaxweynuhu waa madaxa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana loo dooran kara muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 88-aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.
2. Nidaamka xukunka Dawladda Soomaaliya waa nidaam Baarlamaani ah, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa kulan wadajir ah ku dooranaya xildhibaannada labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
3. Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa loo raacaya sida ku xusan Qodobka 89aad ee Dastuurka, GMDQ ayaana maamulaya sida ku cad Qodobka 111G (2)(a) ee Dastuurka ayadoo loo fulinayo si waafaqsan Xeer Hoosaadka kulamada wadajirka labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
4. Maalinta doorashada Madaxweynaha JFS waxaa reeban hadaljeedinta murashaxiinta iskood u tanaasulay iyo marti-sharafta iyo olole kasta oo saameyn ku yeelan kara codbixiyeyaasha ilaa doorashadu ka dhaceyso, waxaana lagu faahfaahinayaa habraac ay soo saaraan GMDQ si waafaqsan Dastuurka, Xeer Hoosaadka Baarlamaanka FS iyo habraaca doorashada Madaxweynaha.
5. Murashaxa ku guuleysta xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, isla marka la doorto wuxuu Baarlamaanka Federaalka hortiisa ku marayaa dhaar, waxaana dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda Sare si waafaqsan Qodobka 96aad ee Dastuurka kmg.
6. Madaxweynaha JFS ayaa ka soo magacaabaya xisbiga ama isbahaysiga doorashada ku guulaysta kuraasta ugu badan aqlabiyadda Baarlamaanka (50% +1) Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.
7. Ra'iisul Wasaaraha la magaacaabay iyo Golihiisa Wasiirrada ayaa waydiisanaya Baarlamaanka codka kalsoonida.

dawan Africa

## Qodobka 12-aad:
## Doorashooyinka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka

1. Hannaanka Doorasho ee Labada Gole ee Baarlamaanku waxay noqonaysaa mid tix-gelinaysa isu-dheellitirnaanta qeybaha bulshada (haweenka, dhalinyarada, dadka laga tirada badanyahay, dadka naafada ah iyo beelaha Soomaaliyeed) si waafaqsan Qodobka 64aad faqradiisa (3) iyo Qodobka 72aad xarafkiisa (c) ee Dastuurka.
2. Sida uu dhigayo qodobka 64aad ee Dastuurku, kuraasta loo tartamayo ee Golaha Shacabku waa 275 Xubnood, waxayna matelaan dhammaan Bulshada Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan. Doorashadu waxay ka dhaceysaa dalka oo dhan.
3. Ilaa iyo inta laga gaarayo tirakoob rasmi ah oo ka dhaca dalka oo dhan, laguna saleynayo qaybinta kuraasta hab deegaan doorasho, 275-ta xubnaha Golaha Shacabka doorashadoodu waxa ay ka dhacaysaa meel kasta oo suuragal ah iyada oo la ilaalinayo hannaanka awood qaybsiga bulshada soomaaliyeed ku heshiisay.
4. Sida ku cad qodobka 72aad ee Dastuurka xubnaha Golaha Aqalka Sare oo ka kooban ugu badnaan 54, waxaa si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan u dooranaya shacabka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyadoo laga soo kala dooranayo Gobollada uu ka kooban yahay Dowlad Goboleedku.
5. Sida ku xusan Qodobka 72aad xarafka (C) ee Dastuurka waa in xisbiyada si dhab ah u hirgeliyaan nuxurka awood qaybsiga iyo isu dheelitirnaanta matalaada bulshada ee kuraasta Aqalka Sare.
6. Xuquuqda metelaadda Aqalka Sare ee Gobolka Banaadir waxaa Xeer kasoo saaraya labada Gole ee BFS.
7. Doorashada labada gole ee BFS waxay u dhacaysaa si wadajir ah, codbixiyuhunna wuxuu hal mar wada dooranayaa murashaxiinta labada gole.
8. Iyadoo la dhowrayo waajibaadka dastuuriga ah ee midnimada dalka iyo u sinnaanta hannaanka doorashooyinka ee shacabka Soomaaliyeed, iyadoon waxba loo dhimayn nidaamka matalaadda ee ku salaysan deegaan doorashada iyo axsaabta siyaasadda, ilaa iyo inta xal kama dambeys ah laga gaarayo xaaladda siyaasadeed ee gaarka ah ee hadda jirta, doorashada xildhibaannada labada gole ee kasoo jeeda gobollada waqooyi (Somaliland) waxa uu yeelanayaa habraac u gaar ah waxaana xeer kusoo soo saaraya baarlamaanka JFS kadib markii ay helaan talo soojeedinta Siyaasiyiinta ka soo jeeda Gobolada woqooyi (Somaliland).
9. Xisbigii ku guuleysan waaya Doorashooyinka Labada Aqal codad u dhigma boqolkiiba afar (4%) tirada guud ee Xubnaha labada Aqal ama 13 xubnaha Labada Aqal wuxuu luminayaa matelaada xisbi ee labada gole ee Baarlamaanka, Xubnaha la doortayna waxay u joogayaan si madaxbannaan ama axsaab kale ayey ku biirayaan.

## Qodobka 13-aad:
## Cayimaadda Taariikhda Doorashooyinka la qabanayo

1. Doorashooyinka dalka waxaa la qabanayaa afartii sanaba mar si waafaqsan qodobka 60aad ee Dastuurka, bil ka hor dhammaadka mudda xileedka Baarlamaanka.
2. Maalinta doorashooyinka la qabanayo waxaa cayimaya GMDQ, ka dib marka uu xaqiijiyo jiritaanka dhamaan xaaladaha suurtagalinaya Doorashada, waxayna wargelinayaan taariikhda doorashada Goleyaasha Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS, Xukuumadda heer federal iyo heer Dowlad Gobolleed, Xisbiyada Siyaasadeed ee diiwaangashan.

3. GMDQ waa in ay muddeeyaan taariikhda doorashada, ugu yaraan boqol iyo sideetan (180) maalmood ka hor wakhtiga ay codbixintu qabsoomayso.

## CUTUBKA 3-aad:
## DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA
### Qodobka 14-aad:
### Diiwaan-gelinta Codbixiyaha

1. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay yeelaneysaa diiwaanka codbixiyeyaasha dalka oo uu diyaariyo GMDQ
2. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha waxaa ka mas'uul ah GMDQ sida ku xusan Qodobka 111G faqradiisa (2) (c) ee Dastuurka iyo Qodobka 14aad ee Sharciga dhisidda GMDQ.
3. GMDQ waxaa uu sameynayaa diiwaanka codbixiyeyaasha oo lagu diiwaan-gelinayo qof kasta oo buuxiya shuruudaha diiwaan-gelinta codbixiyaha.
4. Diiwaangelinta codbixiyaasha, wixii aan halkan lagu sheegin, waxaa nidaaminaya xeer gaar ah oo uu soo saaro GMDQ.
5. GMDQ ayaa mas'uul ka ah diiwaan-gelinta, keydinta xogta diiwaanka iyo xafidaadda xogta diiwaankaba.
6. Codbixiyuhu wuxuu codkiisa ka dhiibanayaa maalinta doorashooyinka meesha uu iska diwaangeliyey.
7. Codbixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo marka la diiwaangeliyo Kaarka diiwaan-gelinta oo ay ku dhameystiran tahay faahfaahinta ku xusan Qodobka 19aad, Faqrada (2) (a) ilaa (f) ee Sharcigan.

### Qodobka 15-aad:
### Shuruudaha diiwaan-gelinta

1. Is diiwaan-gelinta codbixiyuhu waxay u furantahay qofkasta oo Soomaali ah oo gaaray da'da 18 sano waqtiga diiwaan-gelinta.
2. Aqoonsiga qofka Soomaaliyeed ee ku sheegan faqrada (1) ee Qodobkan waxaa loo raacayaa oo tilmaamaya qodobka 8aad ee Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka ee dhaqan-galka ah
3. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha waxaa ka reeban:
   a. Muwaadin kasta oo aan xiskiisu dhammeyn;
   b. Maxaabiista xukuman;
   c. Dadka ajaanibta ah ee dalka ku sugan; iyo
   d. Qof kasta oo aan gaarin da'dii codaynta wakhtiga diiwaan-gelinta si waafaqsan Qodobka 29aad (8) ee Dastuurka.

### Qodobka 16-aad:
### Fulinta Diiwaan-gelinta

1. Doorashooyinka Soomaaliya ee heer federaal waxaa ka codayn kara oo kaliya codbixiyeyaasha isku diiwaan-geliyay in ay codkooda dhiibtaan.
2. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha waxaa fulinaya GMDQ si waafaqsan Qodobka 14aad faqradiisa (2) ee sharcigan.

3. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaashu waa lacag la'aan lagumana xiri karo lacag ama shuruud kale oo aan ahayn shuruudaha ku xusan Qodobka 15aad Faqrada 3aad ee sharcigani tilmaamay, taasoo u diideyso muwaadinka in uu isku diiwaan-geliyo codbixiye.
4. Qof kasta oo isku diiwaan-geliya codbixiye si sharcigan waafaqsan wuxuu marayaa habka gaarka ah ee aqoonsiga qofka (Unique Biometric identification).
5. Si loo fuliyo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha, GMDQ waxay shaqaaleysiinayaan shaqaale xirfad iyo waayo-aragnimo u leh hawlaha diiwaan-gelinta.
6. GMDQ ayaa ka mas'uul ah habeynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda liiska codbixiyeyaasha.
7. GMDQ waxay soo saari karaan xeer-nidaamiyeyaal, go'aamo, habraacyo iyo amarro lagu dhaqan-gelinayo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha si waafaqsan sharcigan.

**Qodobka 17-aad:**
**Bilawga Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha**

1. GMDQ, ka hor inta aysan baahin ama shaacin waqtiga la bilaabayo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo muddada ay soconeyso, waxay wargelinayaan Madaxda qaranka, Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Madaxda xisbiyada.
2. GMDQ waa in uu diyaariyaa macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira diiwaan-gelinta una bandhigaa dadweynaha isagoo isticmaalaya warbaahinta kala duwan ee dalka.
3. Si dadweynaha Soomaaliyeed u fahmaan diiwaan-gelinta, GMDQ waa in ay baraan kuna wacyigeliyaan muwaadiniinta Soomaaliyeed muhiimadda diiwaan-gelinta iyo sida laysku diiwaan-gelinayaba.
4. Si loo gaaro nuxurka faqrada 3aad ee Qodobkani tilmaamayo, GMDQ waa in uu diyaariyaa barnaamijyo wacyigalineed oo codbixiyaha lagu barayo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo doorashooyinka.
5. GMDQ ayaa qorshaynaya xarumaha/goobaha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee dalka iyagoo tixgalinaya duruufaha jira markasta iyo meelkasta.
6. Xisbiyada siyaasadu waxay u soo dirsan karaan wakiillo goobaha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha si ay u la socdaan in nidaamka diiwaan-gelintu waafaqsan yahay sharciga iyo in aysan jirin wax kala takoorid ah ama gabood-fal ah oo muwaaddiniinta qaar looga reebayo diiwaan-gelinta sifo aan sharciga waafaqsanayn.

dawan Africa

**Qodobka 18-aad:**
**Xogta codbixiyaha**

1. Waxaa jiraya foomka diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha oo asaas u noqonaya diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha kaasoo ka koobnaanaya xogtan:
    a. Magaca codbixiyaha oo dhan waafaqsanna aqoonsiga qofka haddii uu jiro;
    b. Taariikhda uu dhashay codbixiyuhu iyo meesha uu ku dhashay;
    c. Lab ama dheddig midka uu yahay codbixiyuhu;
    d. Degaanka (Tuulo, Degsiimo, xaafad) oo ay ka mid tahay degmada;
    e. Saxiixa codbixiyaha ama tilmaan muujinaysa in aan codbixiyuhu saxiixi karayn;
    f. Tirsiga (lambarka) lagu diwaan-geliyay codbixiyaha;
    g. Tirsiga aqoonsiga codbixiyaha haddii uu leeyahay.
2. Kaarka codbixiyaha waxaa waajib ah in ay ka muuqato xogtan hoose:
    a. Magaca codbixyaha oo dhan;
    b. Sawirka codbixiyaha;

c. Lambarka tixraaca diiwaan-gelinta codbixiyaha;
d. Taariikhda uu dhashay codbixiyuhu;
e. Lab iyo dheddig midka uu yahay; iyo
f. Goobta diiwaangelinta ee uu codbixiyuhu iska diiwaangeliyay.
g. Taariikhda la bixiyey kaarka codbixiyaha.

**Qodobka 19-aad:**
**Kaarka Codbixinta**

1. Kaarka codbixintu waa in uu yahay laf aan la been abuuri karin, waxna laga beddeli karin isla markaana aan si fudud u duugoobayn.
2. Codbixiye kasta oo uu ka lumo ama ka xumaado kaarka codbixintu, waxaa uu ku wargalinayaa Saldhigga Booliska ugu dhaw si uu uga qaato warqad caddeyn ah.
3. Mas'uuliyiinta GMDQ ee qaabilsan diiwaan-gelintu marka ay soo gaarto warqadda cadeynta ee ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan, waa in ay diyaariyaan kaar codbixineed oo cusub watana xogtii iyo tixraacii kaarkii hore ee lumay ama ka xumaaday codbixiyaha, kaarkii horena waa in diiwaanka laga saaraa.
4. Codbixiyaha wuxuu xaq u leeyahay in ugu dambayn soddon cisho (30) ka hor maalinta codbixinta loo beddelo kaarka codbixinta haddii uu keeno kaarkii ka xumaaday ama warqadda cadeynta kaarka lumay.
5. Qofka kasta oo hela kaarka codbixineed ee lumay waxaa ku waajib ah in uu geeyo saldhiga boolis ee ugu dhaw, Dowladda Hoose ama Xafiiska GMDQ ee ugu dhaw.

**Qodobka 20-aad:**
**Dhawrista Xogta Codbixiyaha**

dawan Africa

1. Xogta diiwaanka codbixiyuhu waa sir gaar u ah Qaranka Soomaaliyeed iyo codbixiyaha is-diwaan-galiyey, waxaana keydinaya oo ilaalinaya GMDQ.
2. Ilaalinta xogta diiwaanka codbixiyuhu waa waajib waxaana reebban in sifo aan sharciga waafaqsanayn looga faa'iidaysto.
3. Qofkasta oo sifo aan sharcigan iyo xeerarka kale ee dalka waafaqsanayn u bixiya xogta, wax uga beddela ama si kale uga faa'iidaysta waxaa uu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta ee la xiriira bixinta sirta Qaranka.
4. Xogta cod-bixiyaha waa sir, cidna lalama wadaagi karo, hase yeeshee waxaa lagu bixin karaa oo keliya haddii uu sharci sidaas waajibinayo ama amar ay soo saartay Maxkamad awood u leh.

**Qodobka 21-aad:**
**Kaalinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta**

1. Marka uu codsado GMDQ Wasaaraddu waxa ay Guddiga ka caawinaysaa sugitaanka muwaadinka Soomaaliyeed ee xaqa u leh in loo diiwaangeliyo codbixiye maadaama ay Diiwaanka guud ee dadweynaha mas'uul ka tahay.
2. Marka uu codsado GMDQ Wasaaraddu iyadoo kaashaneysa Wasaaradda Amniga gudaha ayay waxaa ay ka qayb qaadanaysaa sugidda Amniga iyo dejinta xasaradaha goobaha diiwaangelinta codbixiyeyaashu ka dhacayso.

**Qodobka 22-aad:**

**Soo-saarista Liiska codbixiyeyaasha**

1. Marka la dhameystiro diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha, GMDQ wuxuu soo saarayaa liis ku-meel-gaar ah muddo laba bilood gudahood ah.
2. Markii GMDQ sixitaan iyo dib-u-eegis ku sameeyo liiska ku-meel-gaarka ah, lana diiwaan-geliyo wixii is beddel ah ee lagu sameeyay, GMDQ wuxuu diyaarinayaa liis kama-dambeys ah oo noqonaya midka la faafinayo laguna codeynayo.
3. Liiska kama danbeysta ah GMDQ waxaa ay la wadaagi doonaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo xisbiyada siyaasadda muddo laba (2) bilood ah ka hor maalinta doorashada.

**CUTUBKA 4-aad:**

**MURASHAXIINTA IYO OLOLAHA DOORASHOOYINKA EE XISBIYADA**

**Qodobka 23-aad:**

**Xisbiyada Ka-qeyb-galaya Doorashooyinka**

1. Doorashooyinka waxaa ka qeybgalaya xisbiyadda sida rasmiga ah loogu diiwaan-geliyey in ay ka qeyb qaataan doorashooyinka.
2. Xisbiyadda waxaa doorashooyinka uga qeyb-galaya murashaxiinta ay u soo xuleen in ay uga qeyb-galaan tartanka doorasho ee kuraasta xubnaha Baarlamaanka.
3. Xisbiyaddu marka ay soo xulayaan murashaxiinta uga qeyb-galaysa doorashooyinka waa in ay dhawraan tixgaliyaanna isu-dheellitirnaanta bulshada Soomaaliyeed si waafaqsan Qodobka 12aad faqradda 3aad ee Sharcigan.
4. Xisbiyadu marka ay soo xulayaan Murashaxiinta doorashooyinka uga qeyb galaya waa inay dhowraan qoondada haweenka oo ah ugu yaraan boqolkiiba 30% xubnaha murashixiinta xisbi kasta. Baarlamaanka JFS ayaa xeer ku soo saaraya hannaanka ugu habboon ee lagu xaqiijinayo qoondada haweenka ee faqraddan ku xusan.

dayan Africa

**Qodobka 24-aad:**

**Murashaxiiinta Doorashooyinka**

1. Qof kasta oo Soomaali ah oo buuxiyay shuruudaha sharcigu tilmaamay waxaa uu xaq u leeyahay in la doorto waxna uu doorto, sida ku cad qodobka 22 (2) ee Dastuurka.
2. Murashax doorasho u taagan waxaa noqon kara qof kasta oo shuruudaha murashaxnimada buuxiyay isla markaana uu xisbi soo sharraxay.
3. Xisbiyadda siyaasadeed ayaa magacaabaya murashaxiinta xisbiga uga qeybgalaya doorashooyinka Baarlamaanka si waafaqsan dastuurrada xisbiyada.
4. Xubnaha ciidamada qalabka-sida, shaqaalaha Dowladda, diblomaasiyiinta, iyo xubnaha bahda garsoorka looma soo sharrixi karo doorasho liiskana laguma soo dari karo haddii aysan keenin cadayn shaqo ka tegis.
5. Warqadda caddaynta shaqo ka tegista looma diidi karo Murashaxa dibna looguma dhigi karo sabab la'aan.

**Qodobka 25-aad:**

**Shuruudaha Murashaxiinta**

1. Murashaxiinta u tartamaya xubnaha Baarlamaanka Federaalku waa in ay buuxiyaaan shuruudaha ku xusan qodobka 58aad ee Dastuurka oo tilmaamaya qofka kamid noqonaya xubnaha Baarlamaanka federaalka una dhigan sidan:

   a. In uu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo aan xuquuqdiisa muwaadinnimo go'aan Maxkamadeed lagu hakin shantii (5) sano ee u danbeeyay;
   b. Xiskiisu dhanyahay;
   c. Dadiisuna ka yarayn 25 jir;
   d. Waa in uu kamid yahay codbixiyeyaasha ku jira Diiwaanka codbixiyaha;
   e. Leeyahay aqoon dugsi sare ugu yaraan ama waayo aragnimo u dhiganta
2. Iyadoo aan waxba loo dhimmayn shuruudaha ku xusan faqrada (1) ee Qodobkan, murashaxa u tartamaya doorashooyinka Baarlamaanka waa in aan shantii sano ee u danbeeyay aanu ku dhicin xukun ciqaab oo kama-danbeys ah.
3. Qof kasta oo murashax xubin Baarlamaan ahi waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka dalka.
4. Murashaxiinta u tartamaya xubinnimada Baarlamaanka JFS waxay bixinayaan khidmad aan celin lahayn, oo dhan Shilin Soomaali u dhigma laba kun oo Doolarka Mareykanka ah ($2000) taas oo lagu shubayo qasnada Dowladda.

**Qodobka 26-aad:**

**Soo-gudbinta Magacyada Murashaxiinta**

1. Xisbiyadu waa in ay soo gudbiyaan magacyada murashaxiinta xisbigooda uga qeyb-galaya doorashooyinka Baarlamaanka 75 (Todobaatan iyo shan maalmood) oo maalin shaqo ah ka hor maalinta doorashooyinka.
2. Qoraalka xisbiyadu ku soo gudbinayaan murashaxiintooda waa in ay ku soo caddeeyaan, magaca murashaxa oo afaran, magaca hooyada, da'diisa iyo deegaankiisa.
3. Magacyada murashaxiinta xisbiyadu u soo gudbinayaan GMDQ waxaa waajib ah in la soo raaciyo:
   a. Caddeymaha murrashax kasta ku muujiyey in uu oggol yahay murashaxnimada la soo sharraxay iyo in uu ixtiraamayo xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka;
   b. Go'aanka xisbigu ku ansaxiyay murashaxiinta doorashooyinka uga qeyb-galaysa;
   c. Warqadda caddeynta lacag qabashada khidmada oo lagu shubo xisaab banki ee dowladda;
   d. Warqadda cadaynta shaqo ka tegista si waafaqsan qodobka 24(4) ee Sharcigan.
4. Muran iyo khilaaf kasta oo ka dhasha xulista ama soo-gudbinta liiska murashaxiinta oo ka dhex dhasha xisbi gudahiisa waxaa go'aan ka gaaraya Guddiga xallinta khilaafaadka ee xisbiga si waafaqsan dastuurka xisbiga.
5. GMDQ wuxuu hubinayaa in xisbigu u soo xulay murashaxiinta si xeerarka doorashooyinka iyo hab-raacyada waafaqsan.

**Qodobka 27-aad:**

**Hubinta iyo Kala Saarista Murrashaxiinta**

1. Xisbiyada waxaa waajib ku ah in ay si caddaalad ah u kala saaraan murashaxiinta marka ay soo xulayaan.
2. Xisbiyadu waa in ay hubiyaan in xubnaha ay soo sharraxayaan buuxiyeen shuruudaha sharcigan tilmaamay iyo in kale isla markaana xilka iyo mas'uuliyadda loo idmanayo u gudan karaan si hufan oo habboon.

3. GMDQ marka ay helaan liiska murashaxiinta xisbiyadu soo gudbiyeen waa in ay qof qof u hubiyaan in murashaxiinta la soo gudbiyay buuxiyeen shuruudihii loo baahnaa.
4. Haddii GMDQ ku qanco in xubin ama xubno liiska ka mid ahi aysan buuxin shardi ama shuruudaha murashaxnimo, waxay muddo 6 cisho gudahood oo maalin shaqo ah ku ogeysiinayaan xisbigii u soo gudbiyey in uu muddo 14 maalmood ah ku soo dhamaystiro shuruudaha dhiman ama murashaxa/murashaxiinta beddelkiisa/kooda ku keeno.
5. Marka uu hubiyo shuruudaha murashaxiinta ee uu ku qanco GMDQ waxaa uu si rasmi ah ugu dhawaaqayaa liiska murashaxiinta ee loo soo gudbiyay.
6. GMDQ iyo xafiisyada doorashooyinka ee hoos yimaadaa waa in ay goob kasta oo codbixineed gaarsiiyaan nuqullada liisaska murashaxiinta Baarlamaanka ee ka sharraxan xisbiyada u tartamaya kuraasta deegaankaas.

**Qodobka 28-aad:**

**Astaamaha iyo Xuquuqda Xisbiyada iyo Murashaxiinta**

1. Murashaxiinta xisbiyadda waxaa sumad u noqonaya astaanta xisbiga soo sharraxay.
2. Astaamaha xisbiyaddu waa in ay kala duwanaadaan oo xisbina uusan isticmaalin astaan xisbi kale.
3. Astaantu waa in ay noqoto mid gaar ah oo muujinaysa summadda aqoonsiga xisbiga waxaa reebban in ay ka muuqato calaamad dowladeed, mid qabyaaladeed iyo mid dariiqo diineed astaanta xisbiga.
4. Murashaxiinta u tartamaya Goleyaasha Baarlamaanka ee uu GMDQ ugu dhawaaqay si waafaqsan Qodobka 27aad faqrada (5) ee sharcigan, waxay xaq u leeyihiin in la ilaaliyo xuquuqdooda murashaxnimo si waafaqsan Shuruucda dalka.

**Qodobka 29-aad:**

**Ololaha Doorashooyinka**

1. Ololaha doorashooyinka ee isu soo baxyada bannaanka waxaa maamulaya GMDQ oo u qoondeynaya xisbiyada doorashooyinka ku loolamaya wakhtiga iyo maalmaha ololaha ay kala yeelanayaan.
2. Ololaha doorashadu waxaa uu bilaabanayaa 45 maalmood ka hor maalinta loo cayimay qabsoomidda doorashooyinka wuxuuna dhammanayaa 24 saac ka hor taariikhda doorashooyinka.
3. GMDQ ayaa go'aaminaya jadwalka ololaha doorashooyinka, sida ay xisbiyadu ololaha u kala galayaan iyo maalmaha ay kala yeelanayaan iyagoo qiimeynaya xaaladaha kala duwan ee ku gaadaaman doorashooyinka.
4. GMDQ waxaa waajib ku ah in ay si cadaalad ah ugu qeybiyaan xisbiyadda ku tartamaya doorashooyinka maalmaha iyo goobaha ololaha doorashada ee xisbi walba.
5. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddiga Amniga ee doorashooyinka iyo mas'uuliyinta dowlad gobolleedyada waxaa waajib ku ah in ay ku dhaqmaan jadwalka wakhtiyeysan ee GMDQ soo saareen uguna kala qoondeeyeen xisbiyada ama sida ay u kala yeelanayaan maalmaha ololaha.

dawan Africa

**Qodobka 30-aad:**

**Waxyaabaha ka Reebban Ololaha**

1. Waxaa reebban in isu soo baxyada ololaha doorashada lagu qabto agagaarka iyo gudaha masaajidda iyo meelaha kale ee aan ku habboonayn sida goobaha waxbarashada iyo caafimaadka.
2. Isku soo baxyada iyo kulamada xisbiyadu ay qabsanayaan wakhtiga ololaha waxaa ka reebban in loo qaato hub, labis ciidan ama wax-u-eg, marka laga reebbo ciidamada ammaanka.
3. Waxaa reebban haddalada xanafta leh ee bulshada Soomaaliyeed kala fogeynaya waxna u dhimaya dhaqanka, diinta, nabadgalyada iyo danta guud ee ummadda Soomaaliyeed.
4. Waxaa ka reebban xisbiyadda in ay ku ololeeyaan arrimo keeni kara kicin qabyaaladeed iyo kooxaysi diimeed oo abuuri kara fitno iyo khilaaf.
5. Waxaa reebban in xisbi gaar ahi hantida ummada u adeegsado ololaha doorashooyinka uguna takri-falo dhaqaalaha dalka.
6. Xisbiyaddu si siman ayey u isticmaalayaan warbaahinta Dowladda iyo fagaarayaasha layskugu soo baxo muddada ololaha doorashadu socoto.
7. Xisbiyadda ku tartamaya doorashooyinka waxaa ka reebban oo mamnuuc ka ah in ay dhaqaale shisheeye u isticmaalaan ololaha Doorashooyinka sida uu qabo sharciga xisbiyada.
8. Xisbi kasta oo ay ku caddaato in uu dhaqaale shisheeye ku isticmaalay ololihiisa waxaa lala tiigsanayaa Sharciga si waafaqsan qodobka 25aad iyo 26aad ee sharciga xisbiyada siyaasadda (Sharci Lr.19 ee 2016).

**Qodobka 31-aad:**

**Warbaahinta iyo Doorashooyinka**

1. Warbaahinta waxaa ku waajib ah xilliga doorashooyinka in ay tabiyaan warar isku dheellitiran oo ka hufan been abuur, nacayb, kicin iyo wax kasta oo wadajirka ummadda Soomaaliyeed waxyeelaya dhaawacayana nabadgelyada Dalka.
2. Warbaahinta waxaa kaalintoodu tahay baahinta barnaamijyada iyo fariimaha wacyigelinta ee ku saabsan doorashooyinka si dadweynaha Soomaaliyeed u helaan xogta ay u baahan yihiin ee la xiriira doorashooyinka.
3. Warbaahintu ma tabin karto warar la xiriira natiijada doorashooyinka oo aan GMDQ ka soo bixin.
4. Warbaahinta waxaa ay wararka ku saabsan geeddi-socodka doorashooyinka iyo natiijada doorashooyinka ka qaadan karaan oo keliya GMDQ.
5. Warbaahintu waxaa ay ku dhaqmayaan Xeerka hab-dhaqanka saxaafadda ee xilliga doorashooyinka oo GMDQ diyaarinayo.
6. Hay'adaha Cilmibaarista ee diiwaangashan waxay saadaal ka bixin karaan doorashooyinka, warbaahintuna iyaga ayey kasoo xigan kartaa.

## CUTUBKA 5-aad:
## DIYAAR-GAROWGA DOORASHOOYINKA IYO CODBIXINTA

### Qodobka 32-aad:
### Hawl-galka

1. GMDQ waxay diyaarinayaan jadwal muddaysan oo si cad u tilmaamaya qorshaha hawl-galka doorashooyinka.
2. GMDQ waxay siinayaan tababaro ku filan shaqaalaha iyo hawl-wadeenada ka hawl-galaya goobaha doorashooyinka ee ku xusan qodobka 9aad ee sharcigan.
3. GMDQ waxay hubinayaan inta doorashooyinka ka horeysa in hawl-wadeenada ay qaateen tababar ku filan oo ay si hufan hawshooda u gudan karaan.

### Qodobka 33-aad:
### Diyaarinta Agabka Doorashooyinka

1. GMDQ waxaa uu diyaarinayaa agabka muhiimka u ah doorashooyinka oo nooc walba leh.
2. Agabka doorasho ee ku xusan faqrada (1) ee qodobkan, GMDQ waxay ku bixinayaan qandaraas furan oo loo siman yahay loona maamulay si daah-furnaan iyo caddaalad ah, oo waafaqsanna Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.
3. Qandaraaslaha ku guulaysta qandaraaska furan, GMDQ waxay la galayaan heshiis qandaraas muddaysan oo lagu caddeeyay nooca iyo baaxadda qandaraaska, muddada lagu keenayo agabka iyo sida loo bixinayo lacagta. Haddii xaalado degdeg ah soo baxaan waxaa loo noqonayaa Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.
4. Xubnaha GMDQ, qoysaskooda iyo meheradahooda ganacsiba waxaa ka reeban in ay ka qeyb-galaan qandaraasyada ay bixiyaan.

### Qodobka 34-aad:
### Waraaqaha Codbixinta

Waraaqaha codbixinta waa in lagu soo daabacaa astaanta xisbiga, magaca iyo sawirka murashaxa doorashada ka qeyb-galaya. GMDQ ayaa xeer-nidaamiye ku soo saaraya faahfaahinta qodobkan.

### Qodobka 35-aad:
### Agabka loo baahanyahay

1. GMDQ wuxuu diyaarinayaa agabka muhiimka u ah xarun/goob codbixineed walba laga rabo oo ay ka mid yihiin:
    a. Nuqul sharciga doorashooyinka ah;
    b. Xirmo xiran oo ay ku jiraan shaabad iyo khadkeeda;
    c. Xirmo xiran oo ay ku jiraan waraaqaha cod-bixinta;
    d. Sanduuqa ama sanaadiiqda lagu codaynayey;
    e. Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha xarunta/goobta;
    f. Saddex foom oo kala ah midka cabashada, midka warbixinta iyo midka tirinta;
    g. Qalimo ku filan calaamadinta warqadaha codbixinta;
    h. Tilmaamo tusaya codbixiyeyaasha qaabka ay u calaamadinayaan waraaqda codbixinta;
    i. Khadka aan tirmin ee lagu calaamadiyo qofka codka dhiibtay; iyo
    j. Qalab ama agab kasta oo muhiim u noqon kara codbixinta doorashooyinka.

2. Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido sanduuq gaar ah waa in la xiraa lana ningaxaa/lingaxaa.
3. GMDQ waa in ay qalabka muhiimka ah ee doorashooyinka diraan wakhti munaasib ah iyagoo ay la socdaan sanaadiiqdii codbixintu.
4. Qalabka ku xusan faqrada (3) ee qodobkan waxaa loo dirayaa xafiisyada doorashooyinka ee heer Dowlad-goboleed oo iyaguna u sii gudbinaya xarumaha codbixinta oo iyaguna usii qeybinaya goobaha codbixinta.
5. Waraaqaha codbixinta ee goobaha codbixinta waxaa uu GMDQ ku jaan-goynayaa tirada codbixiyeyaasha goobta ka diiwaan-gashan oo lagu daray tirada dadka ka hawl-galaya goobta codbixinta oo ah shaqaalaha GMDQ, goobjoogayaasha maxalliga ah, wakiillada xisbiyadda iyo ciidanka amniga ee goobta ku qoran.
6. GMDQ waxay goob kasta oo codbixineed u diyaarinayaan waraaqo codbixineed oo dheeraad ah kuwaas oo aan ka badnayn **2**% tirada waraaqaha loogu talo galay goobta.
7. Waraaqaha dheeraadka ah ee ku xusan faqrada (6) ee qodobkan waxaa keliya oo loo adeegsanayaa beddelaadda waraaqaha codbixinta ee xumaada inta aan lagu codayn.
8. Mar kasta oo lagu codeeyo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah waa in la diiwaangeliyo lana sheego sababta loogu codeeyay waraaqda dheeraadka ah.
9. GMDQ isagoo ka duulaya baahiyaha degdegga ah ee soo baxa lana soo darsa xarumaha codbixinta, wuxuu awood u leeyahay in uu kordhiyo, dhimo, ama qalab cusub ku soo kordhiyo goobta.

**Qodobka 36-aad:**
**Korjoogtaynta Doorashada**

1. Ergooyinka korjoogtaynta doorashada iyo wakiillada xisbiyada siyaasadeed waxay xaq u leeyihiin inay goobjoog ka ahaadaan iyagoo dhowraya daganaashaha iyo habsami u socodka hawlaha goobta doorashada. Tusaale ahaan; codeynta iyo tirinta, baakadeynta, wareejinta, gudbinta iyo xafidaadda agabyada doorashada.
2. GMDQ ayaa Ergooyinka korjoogtaynta siinaya ruqsadda korjoogtaynta kalana noqon kara, ayadoo GMDQ ku soo saarayo xeer-nidaamiye shuruudaha ruqsadsiinta iyo **sababaha** kala noqoshada si waafaqsan qodobka 56aad ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

**Qodobka 37-aad:**
**Diyaar-garawga Codbixinta**

1. Marka agabka doorashooyinka codbixinta loogu talo galay soo gaaro goobta maamulaha goobtu waxaa uu:
   a. Ku wargalinayaa hawl-wadeennada goobta sida ay u kala leeyihiin shaqada goobta;
   b. Hubinayaa in ay wakiillada xisbiyadda tartamayaa goob-joog yihiin;
   c. Hubinayaa in agabkii goobtu dhanyahay xiranyahayna, iyadoo ay joogaan wakiillada xisbiyaddu;
   d. Marka la hubiyo in agabkii doorashooyinka ee goobtu dhanyahay sida shaabbadihii iyo waraaqihii codbixinta, maamulaha goobtu waxaa uu furayaa xirmooyinka waraaqaha codbixinta wuxuuna ku shaabbadeynayaa shaabbadda goobta, iyadoo aan la furi karin waqtiga codbixinta ka hor;
   e. Warqadaha codbixinta waxaa la shaabbadeynayaa marka codbixiyaha la siinayo warqadda codbixinta;

   f. Hubinayaa in liiska murashaxiinta goobta iyo warqaddaha tilmaamaha doorashadu ku dhajisan yihiin meel muuqata oo dadku arki karo.
2. Waxaa reebban in qof aan goobta ku qornayn oo aan ahayn shaqaalaha, hawl-wadeennada, wakiillada xisbiyada iyo ergooyinka korjoogtada uu goob-joog ahaado marka la fulinayo waajibaadka ku xusan faqrada (1) ee qodobkan.
3. Maamulaha goobtu waa in uu si qoraal ah, ku caddeeyaa shaabbadda, tirada waraaqaha codbixinta iyo agabka kale ee goobta la keenay kana saxiixaa hawl-wadeenada iyo wakiillada xisbiyadda.
4. Marka la qabto shaqooyinka ku xusan faqrooyinka 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkan waa in Maamulaha goobtu ku dhawaaqo in codbixintu furan tahay.
5. Haddii ay dhacdo in xisbi tartamaya wakiil u soo dirsan waayo goobta codbixinta sababo xisbigaas u gaar ah doorashadu si caadi ah bay u soconeysaa una joogsan mayso maqnaansha wakiilka xisbigaas.

**Qodobka 38-aad:**

**Waajibaadka Maamulaha Goobta Doorashada**

1. Maamulaha goobtu waa mas'uulka 1aad ee goobta wuxuuna xil ka saaranyahay in uu ilaaliyo nidaamka goobta iyo habsami u socodka hawlaha doorashooyinka.
2. Hawl-wadaneenada goobta ka hawlgalaya oo dhan oo ay ku jiraan xubnaha ciidanka ah ee amniga goobta sugayaa waxay ka amar qaadanayaan maamulaha goobta.
3. Maamuluhu waxaa uu amri karaa in dibadda looga saaro goobta codbixinta ama loo dhiibo hay'adaha amniga cid kasta oo goobta khalkhal gelinaysa.
4. Xubnaha ciidanka ee amniga goobta sugaya looma ogola in ay soo galaan gudaha goobta codbixinta haddaan Maamulaha goobtu sidaas codsan.
5. Maamulaha goobtu waxaa uu awood u leeyahay in uu goobta codbixinta xiro haddii duruufo adag oo aysan doorashadu ka socon karayn la soo darsaan.
6. Maamulaha goobtu waa in uu xarunta goobtu hoostimaada wargaliyaa marka uu isticmaalayo awoodda ku xusan faqrada 5aad ee qodobkan.
7. Maamulaha goobtu isaga ayaa ku dhawaaqaya in codbixinta goobtu furan tahay isaga ayaana ku dhawaaqaya in codbixintii goobtu xiran tahay marka ay gaarto saacaddii loo qabtay.
8. Haddii maamulaha goobtu awoodi waayo gudashada waajibaadkiisa si kastaba haku timaadee waxaa beddelkiisa gelaya maamule ku-xigeenka isla goobtaas.

dayan Africa

**Qodobka 39-aad:**

**Nidaamka Goobta Codbixinta**

1. Goobta codbixinta ee doorashadu ka socoto waxaa gali kara oo keliya shaqaalaha iyo hawl-wadeennada ka shaqeynaya ee GMDQ ka socda, wakiillada xisbiyadda, codbixiyeyaasha, warbaahinta iyo goob-joogayaasha doorashada.
2. Goob-joogayaashu waa in ay wataan kaararka lagu aqoonsado oo GMDQ bixiyey muujinayana in ay yihiin goob-joogayaasha doorashooyinka.
3. Codbixiyeyaashu saf ayey galayaan goobta codbixintana marba qof baa galaya iyada oo dadka loo kala safayo sida safka ay ugu soo kala horeeyeen una kala istaagayaan rag iyo dumar.
4. Dadka jilicsan ee da'da ah, baahiyaha gaarka ah leh, hooyooyinka uurka leh ama caruurta sita waa in loo samo-falaa oo dadka kale laga hormariyaa.
5. Waxaa reebban in codbixiyeyaashu hub nooc kasta oo uu yahay la yimaadaan goobta.

**Qodobka 40-aad:**
**Goobta Codbixinta dhexdeeda**

1. Goob kasta oo codbixineed waxaa ay yeelanaysaa ugu yaran laba qolqol oo yar yar (daahyo ayaa laga sameyn karaa) oo loogu talo galay in codbixiyuhu ku calaamadiyo warqadda codbixinta.
2. Goobta codbixinta waxaa loo oggol yahay oo keliya dadka ku xusan qodobka 39aad faqradda 1aad ee Sharcigan.
3. Goob kasta oo codbixineed waxaa la dhigayaa liiska magacyada shaqaalaha iyo hawl-wadeenada oo ay ku jiraan wakiillada xisbiyadu.
4. Goobta codbixinta iyo agabka doorasho ee dhexyaalaba waxaa ilaalinaya tiro ciidan ah oo loogu talo galay, haseyeeshee looma oggola in ay galaan goobta maamulaha oo sidaas codsada mooyee.
5. Qolqolka codbixinta dhexdiisa waxaa mamnuuc ka ah in lagu xiro qalabka kasta oo wax lagu sawiro ama lagu dhageysto.

**Qodobka 41-aad:**
**Codbixinta**

1. Xoghayaha goobtu wuxuu hubinayaa in kaarka codbixinta ee uu sito codbixiye kasta uu yahay midkii saxda ahaa qofka sitaana uu yahay qofkii lahaa isla markaana uusan horey codkiisa u soo dhiiban.
2. Codbixiyaha waa in la siiyaa warqaddii cod-bixinta oo shaabbaddii goobta leh marka la hubiyo kaddib.
3. Codbixiye kasta marka uu codka dhiibanayo wuxuu gelayaa qolqolka codeynta wuxuuna u calaamadinayaa warqadda codbixinta qaabka loogu talo-galay.
4. Codbixiyuhu wuxuu sanduuqa codbixinta ku ridayaa warqadda codbixinta iyadoo isku laaban.
5. Codbixiyuhu marka uu codka dhiibto waa in faryarada bidix lagaga calaamadiyo khad aan tirtirmayn oo muujinaysa in uu codeeyay, haddii aanu lahayna gacanta midigta ayaa beddeleysa, haddii iyadana aysan jirin waxaa laga calaamadinayaa meel muuqata oo jirkiisa ka mid ah.
6. Haddii warqadda codbixintu aysan dhamayn ama dhaawac qabto inta uusan calaamadeyn, codbixiyuhu waa in uu soo celiyo oo maamulaha goobta weydiisto mid dhamaystiran oo sax ah.
7. Codbixiyeyaashu waa in aysan cudurdaar la'aan ku daahin qolqolka codbixinta, haddii ay dhacdana maamulaha goobtu waxaa uu awood u leeyahay in uu ka soo saaro kana qaado waraaqda codbixinta qof kasta oo ku daaha.
8. Codbixiyeyaasha goobta looga saaray si waafaqsan faqrada 7aad ee qodobkan waxaa mar kale loo oggolaan karaa inay codkooda dhiibtaan marka dhammaan dadka kale ee goobta ku sugani codkooda dhiibtaan.
9. Haddii cod-bixiye lagu helo in uu sito waraaq cod-bixineed oo aan ahayn tan goobta laga bixiyey ama waraaqo dheeraad ah ama uu hore codkiisa u soo dhiibtey, maamulaha goobtu waa in uu si degdeg ah u amro in la qabto oo booliska loo dhiibo si maxkamad loo horgeeyo, waana in arrintaa warbixinteeda loo gudbiyo saraakiisha sare ee doorashooyinka.
10. Codbixiyeyaasha qaba duruufo gaar ah oo aan u saamaxayn in ay codkooda si caadi ah u dhiibtaan sida dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama da'da ah iyo qof kasta oo codsada in la caawiyo, waxaa loo calaamadinayaa rabitaankiisa waxaana qofka uu rabo u calaamadinaya maamulaha goobta ama maamuluhu qof uu u wakiishay iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyadu.

davan Africa

## Qodobka 42-aad:
## Muddada Codbixinta

1. Muddada codbixintu waa hal maalin oo ka bilaabmeysa 6:00am subaxnimo kuna eg 6:00pm maqribnimo.
2. Wakhtiga ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan lagu camal fali maayo oo codbixintu way soconaysaa haddii ay jiraan codbixiyeyaal safka ku jira oo aan wali codkooda dhiiban ilaa laga dhammrystirayo codbixiyeyaasha markaas safka taagan.
3. Marka ay gaarto saacadda xiritaanka (6:00 maqribnimo) ee goobta doorashada, maamulaha goobta ama hawl-wadeen uu igmaday ayaa soo baxaya oo eegaya/fiirinaya dadka safka ku jira ee aan wali codkooda dhiiban qofka u danbeeya ayuuna calaamadsanayaa si aysan cid danbe ugu soo biirin safka.
4. Marka la dhammeystiro codeynta dadka safka ku jira ee ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan ayuu maamuluhu ku dhawaaqayaa in codbixintii xirantahay.

## Qodobka 43-aad:
## Cabashooyinka Goobta

1. Wixii cabashooyin ah ee ay qabaan wakiillada xisbiyadu, codbixiyeyaasha ama qof kasta oo ka cabanaya in xuquuqdiisa doorasho la duudsiyey waa in ay qoraal ugu gudbiyaan xarunta ka sarreysa goobta codbixinta iyo GMDQ ayadoo nuqul la siinayo maamulaha goobta.
2. Maamulaha goobtu waa in uu warbixin qoraal ah ka soo saaro cabashooyinka loo soo gudbiyey iyo wixii muran ah ee ka dhashay hawsha doorashooyinka goobtiisa.
3. Cabashooyinka goobta ee loo soo gudbiyey maamuluhu waa in uu qoraal ahaan u diiwaangeliyaa si xafiisyada sare ee GMDQ loola socodsiiyo.

# CUTUBKA 6-aad:
# TIRINTA CODADKA IYO NATIIJADA DOORASHOOYINKA

## Qodobka 44-aad:
## Isu Diyaarinta Tirinta Codadka

1. Marka ay codeynta goobtu dhammaato goobtana albaabada loo xiro, maamulaha goobtu waxaa uu iskugu yeerayaa dhammaan shaqaalaha iyo hawl-wadeennada goobta, wakiillada xisbiyada iyo goob-joogaayasha isaga oo ku wargalinaya in goobtu xiran tahay lana bilaabayo tirintii codadka la dhiibtay iyadoo cid soo gali karta iyo cid ka bixi kartaana aysan jirin inta ay tirintu socoto.
2. Ka hor inta aan la bilaabin tirinta codadka, maamulaha goobtu waa in uu hawl-wadeenada goobta ku amraa in dhammaan waraaqaha iyo qalabka goobta yaal ee aan muhiimka u ahayn tirinta codadka laga qaado meesha.
3. Maamuluhu waxaa uu hubinayaa tirada guud ee codbixiyeyaasha codka dhiibtay isaga oo fiirinaya tirada waraaqaha codbixinta ee la isticmaalay iyo tirada codbixiyeyaasha ka diwaangashan goobta isagoo ku qoraaya foomka warbixinta.
4. Waxaa uu tirinayaa maamuluhu iyagoo dhammaan hawl-wadeenada, wakiillada xisbiyada iyo goob-joogayaasha ay goob-joog ka yihiin waraaqaha codbixinta ee aan la isticmaalin waxaana uu ku ridayaa bashqad loogu talo galay.
5. Waxaa la tirinayaa tirada waraaqaha codbixinta ee xumaaday ee ay soo celiyeen codbixiyeyaashu ama la arkay in ay xun yihiin waxaana lagu ridayaa bashqad u gaar ah oo loogu talo galay.

**Qodobka 45-aad:**
**Bilaabidda Tirinta Codadka**

1. Marka la dhammeystiro hawsha diyaargarawga tirinta codadka ee ku xusan qodobka 44aad ee sharcigan waxaa la bilaabayaa tirinta waraaqaha codbixinta ee sanduuqa ku jira.
2. Tirintu waxay ku bilaabmeysaa furista sanduuqa, xoghayaha goobta ayaana marba hal warqad codbixineed ka soo saaraya sanduuqa wuxuuna u dhiibayaa maamulaha goobta oo furaya warqadda cod la maqli karana ku sheegaya Murashaxa uu codbixiyuhu codkiisa siiyay.
3. Marka uu maamuluhu sheego Murashax codka la siiyay waxaa uu ku celinayaa xoghayaha oo sii tusaya wakiillada xisbiyadda
4. Marka lagu dhawaaqo xisbiga codka la siiyay, hawl-wadeenka u xilsaaran ayaa galinaya natiijiyada foom loogu talo galay tirinta codadka xisbiyadu kala heleen warqaddana wuxuu ku ridayaa bashqad xafidan oo calaamadda xisbiga codka helay leh.
5. Hawsha tirinta waxaa maamulaya hawl-wadeenada GMDQ ee goobta, wakiillada xisbiyaduna si feejigan ayey ula soconayaan si ay u xaqiijiyaan in tirintu si habsami ah u socoto.
6. Marka hawsha tirintu dhammaato, hawl-wadeenada goobta oo uu maamuluhu hoggaaminayo waxaa ay hubinayaan in ay tiro ahaan isleeyihiin isu gaynta waraaqaha codbixinta, waddarta tirada codadka xisbiyadu heleen, codadka lagu muransan yahay, xumaaday ama aan ansaxa ahayn, kuwa aan la isticmaalin iyo codbixiyeyaasha diiwaanka ku qoran.
7. Maamulaha goobtu waxaa uu waraaqaha codbixinta ee xumaaday, kuwa waxba kama jiranka laga soo qaaday, kuwa muranku ka taagan yahay iyo waraaqaha cabashada ku ridayaa bashqad gaar ah oo loogu talo galay.
8. Sidoo kale maamuluhu waxaa uu waraaqaha codbixinta ee la tiriyay ku ridayaa bashqad gaar ah iyagoo kala soocan ama u kala xiran xisbi-xisbi sanduuqii ayaana lagu celinayaa laguna ningaxayaa/ lingaxayaa.

dawan Africa

**Qodobka 46-aad:**
**Soo-gabagabeynta Tirinta Codadka**

1. Marka la dhameystiro hawsha tirinta codadka doorashooyinka ee ku xusan qodobka 45aad ee sharcigan, Maamulaha goobtu waxaa uu ku dhawaaqayaa wadarta guud ee tirada codbixiyeyaasha, codadka guud ee ansaxay, codadka xumaaday, waraaqaha soo haray ee aan lagu codeyn iyo Murashax kasta tirada codadka uu goobta ka helay.
2. Bashqadaha lagu riday waraaqaha kala duwan ee codbixinta waa la xirayaa oo la ningaxayaa/lingaxayaa waxaana dusha lagaga dhufanayaa shaabbadda goobta waxaana dusha ka saxiixaya maamulaha goobta iyo wakiillada xisbiyadda.
3. Wakiillada xisbiyada waxaa waajib ku ah in ay saxiixaan natiijada goobta, hadday cabasho ka qabaana waa in ay soo gudbiyaan loona diiwaangaliyaa cabashadaas.
4. Foomka natiijada doorashada waxaa lagu dhejinayaa goobta codbixinta.
5. Bashqad walba oo wax lagu riday waxaa dusheeda lagu qorayaa faahfaahinta waxa ku jira bashqadda.
6. GMDQ waxaa ay awood u leeyihiin in ay soo saaraan habraacyo faahfaahinaya hawlaha tirinta haddii loo baahdo.

**Qodobka 47-aad:**

**Codadka Xumaaday**

1. Warqaddaha xumaaday waa kuwa aan codkooda cidna loo tirinayn sababahan awgood:
    a. Waxay ka duwan yihiin waraaqihii rasmiga ahaa ee GMDQ go'aamiyey in doorashooyinka lagu galo;
    b. Waxaa aysan lahayn shaabbaddii goobta;
    c. Haddii aysan calaamadba lahayn;
    d. Haddii hal murashax wax ka badan loo calaamadiyey;
    e. Haddii warqadda laga aqoonsan kari waayo murashax codka la siiyay.
2. Warqadda codbixintu waxaa ay waxba kama jiraan noqoneysaa marka ay si wada jir ah iskugu raacaan maamulka, hawl-wadeenada goobta codbixinta iyo wakiillada xisbiyaddu.
3. Haddii ay isku khilaafaan maamulka, hawl-wadeenada iyo wakiilladu saxnimada warqadda codbixinta, waxaa warqadda codbixinta loo aqoonsanayaa warqad muran ka taaganyahay.
4. Waraaqaha codbixinta ee laysku qabsado ama muranku ka taaganyahay waxaa go'aan ka gaaraya hawlwadeennada goobta codbixinta.
5. Haddii ay xallin kari waayaan muranka waxaa la keenayaa xarunta dhexe ee tirinta codadka ee GMDQ.

**Qodobka 48-aad:**

**Gudbinta Natiijada Goobta**

1. Marka la dhammeystiro hawlaha tirinta ee goobta codbixinta si waafaqsan qodobada sharcigan isla markaana waraaqaha lagu rido bashqadaha loogu talo galay, waxaa la raacinayaa qoraallada raadraaca ah ee tilmaamaya waxaa ku jira sanduuqa agabka lagu ridayo.
2. Natiijadii goobta codbixinta oo ay la socdaan qoraalada raadraaca ahi ayaa loo gudbinayaa xarunta ay hoostimaad goobta codbixintu.
3. Maamulaha goobta codbixinta wuxuu ku wareejinayaa maamulaha xarunta doorashada natiijada codbixinta goobtiisa oo u kala soocan labada aqal, marka ay ka soo idlaadaan natiijada goobaha hoos yimaada ayagoo goobjoog ka yihiin wakiillada axsaabta, maamulaha xarunta wuxuu ku dhawaaqayaa murashaxa Golaha Shacabka ee guuleystay kadib marka la isku geeyo wadarta cododka uu murashax kasta ka helay goobaha codbixinta ee degaan-doorashadaas wuxuuna u sii gudbineya xafiiska xarunta dhexe GMDQ ee Muqdishu, nuqulna siinayaa xarunta GMDQ ee Dowlad Gobolleedka.
4. Nuqullada qoraalka raadraaca ah ee natiijada goobta laga soo raacinayo waxaa go'aaminaya GMDQ, waxaana waajib ah in nuqul ka mid ah lagu rido sanduuqa agabku ku jiro, iyadoo min hal nuqulna la siinayo xafiiska GMDQ ee heer Dowlad-goboleed iyo xarunta dhexe ee GMDQ.
5. Maamulaha Xarunta doorashooyinka heer Gobol marka ay soo gaaraan natiijooyinka deegaan doorashooyinka Gobolkaas, waxa uu ku dhawaaqayaa murashixiinta ku guuleystay kuraasta Xubnaha Aqalka Sare ee heer Gobol iyadoo loo dirayo natiijada GMDQ heer dowlad Goboleed nuqulna la siinayo xarunta dhexe GMDQ ee Muqdishu.GMDQ heer dowlad Goboleed marka ay soo gaaraan dhammaan magacyada Xubnaha ku guuleestay kuraasta Aqalka Sare ee Dowlad Goboleedkaas wuxuu u dirayaa Xarunta dhexe GMDQ ee Muqdishu.
6. Haddii ay dhacdo in laba murashax ama ka badan ee ugu codadka badan ay helaan codad tiro is le'eg doorashadooda waxaa lagu celinayaa muddo 30 casho gudahood ah.

dayan Africa

7. GMDQ waxay go'aan ka gaarayaan cabashooyinka la xiriira Natiijada doorashooyinka shan maalmood (5) oo shaqo gudahood oo ka billaabata maalinta xigta marka ay dhammaato codbixintu.

**Qodobka 49-aad:**
**Qaabka Xisbiyadu ugu kala Guuleysanayaan Kuraasta**

1. Xisbiyadu waxay u kala helayaan kuraasta loo tartamay sida ay u kala helaan tirada murashaxiinta ku guuleysta tartanka;
2. Xisbi kasta ee ka gudba xaddi-hoosaadka (Threshold) ku xusan Qodobka 12(8) ee Sharcigan, wuxuu ku lahaanayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya tirada kuraasta uu ku soo guuleystay;
3. GMDQ wuxuu ku dhawaaqayaa tirada iyo magacyada xildhibaannada labada Aqal uu xisbi walba ku guuleystay natiijo hordhac ah muddo aan ka badnayn 48 saacadood maalinta doorashada kaddib.
4. GMDQ wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada kama dambeysta ah muddo aan ka badneyn 7 maalmood gudahood.
5. Haddii xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya lumiso xubinnamadeeda waxaa beddelaya qofka doorashadii hore ku xigay si waafaqsan qodobka 59(2) ee Dastuurka.

**Qodobka 50-aad:**
**Dacwadaha la xiriira Doorashooyinka**

1. Khilaafaadka la xiriira doorashooyinka waxaa awood u leh oo ka garnaqaya GMDQ si waafaqsan Qodobka 111G(2)(g) ee Dastuurka iyo Qodobka 14(8) ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka (Sharci Lr. 4 ee 2015).
2. Cabashooyinka ku saabasan go'aannada maamul ee ka soo baxay GMDQ, waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Dalka.
3. Dacwadaha Maxkamadaha u gudbi kara, waa kuwa la xiriira xaqa codbixinta, xaqa ka qeybgalka doorashada iyo go'aanka kama dambeysta ah ee natiijada doorashada.
4. Dacwadaha la xiriira xaqa codbixinta, xaqa ka qeybgalka doorashada iyo go'aanka kama dambeysta ah ee natiijada doorashada ee ay ku dhawaaqeen GMDQ, waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Dastuurka ee dalka sida ku cad qodobka 14aad farqaddiisa 15aad ee Sharci Lr.04, 2015 ee lagu dhisay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka.
5. Xisbiyadda dacwadda ka qaba Natiijada doorashada waa in ay Maxkamadda Dastuurka ee Dalka u soo gudbiyaan dacwadooda muddo 14 maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta GMDQ ku dhawaaqaan natiijada doorashada.
6. Maxkamaduhu waa in ay dacwadaha doorashooyinka ee ay u soo gudbiyeen dhinacyada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkani go'aan kaga gaartaa muddo 15 maalmood ah oo ka bilaabata maalintii dacwadda ay qabatay maxkamaddu.

## CUTUBKA 7-aad:
## QODOBBO QUBANE AH
### Qodobka 51-aad:
### Dembiyada iyo Ciqaabaha ka Dhalanaya Jabinta Sharcigan

1. Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada sharcigan waxaa uu mutaysanayaa ciqaab u dhiganta xadgudubka uu gaystay. Iyadoo aan laga hor-imaaneyn Xeerka Ciqaabta Guud ee dalka, ciqaabta dembiyada la xiriira doorashadu waxay noqonaysaa sidan soo socota:
    a. Qof kasta oo hal mar ka badan isdiiwaangaliya waxaa uu mutaysanayaa xarig dhan afar (4) bilood ama ganaax lacageed oo qaddarkiisa Maxkamaddu go'aamin doonto;
    b. Qof kasta oo ka been sheega xogtiisa waxaa uu mutaysanayaa ciqaab xarig aan ka badnayn 2 bilood ama ganaaax 3 milyan oo Soomaali shilling ah.
    c. Qofka aan u dhalan Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo isku daya in uu isku diiwaangaliyo codbixiye ama ay caddaato in uu sifo qaldan isku diwaangaliyey waxaa uu mutaysanayaa ciqaab aan ka yarayn 6 bilood oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamin doonto.
    d. Mas'uuliyiinta iyo hawl-wadeenada ka shaqeynaya doorashooyinka iyo hawsha ka horeysa ee diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee ku xadgudba qodobada sharcigan waxaa ay mutaysanayaan xarig sanad ilaa saddex sano ah.
    e. Qof kasta oo isku daya in uu been abuuro kaararka codbixinta ama isku daya in uu si wax uga beddelo diiwaanka codbixiyeyaasha waxaa uu mutaysanayaa xarig ciqaab ah oo u dhaxeeya laba sano ilaa afar sano.
    f. Codbixiyaha la yimaad goob codbixineed uguna talo gala in uu ku codeeyo kaar codbixineed oo uusan lahayn waxaa uu galay fal-dembiyeed waxaana uu mutaysanayaa ciqaab 6 bilood ilaa sanad ah iyo ganaax lacageed oo ay Maxkamada awoodda u leh qaddarkeed go'aamiso;
    g. Qof kasta oo urursada kaarar codbixineed oo cid kale leedahay isagoo uga jeeda in uu si kale uga faa'iidaysto maalinta codbixinta doorashooyinka waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa ciqaab xarig oo aan ka yarayn sanad kana badnayn laba sano iyo ganaax lacageed oo ay Maxkamadda awoodda u leh qaddarkiisa go'aamiso;
    h. Qof kasta oo isku daya in uu sameeyo, ka qeyb qaata in la sameeyo kaar codbixineed oo been abuuur ah, waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa xarig laba (2) sano ilaa afar (4) sano ah iyo ganaax lacageed ay Maxkamadda awoodda u leh qaddarkiisa go'aamiso; iyo
    i. Qof kasta oo isku daya in uu sameeyo ama si uga qeyb qaata samaynta waraaqo codbixineed oo been abuur ah oo aan ahayn kuwa GMDQ doorashadu soo sameeyay, waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa xarig saddex (3) sano ilaa Shan (5) sano ah iyo ganaax lacageed ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.
2. Hawl-wadeen kasta oo ka qeyb qaata samaynta dembiyada ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan ama fududeeya in la sameeyo waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa saddex (3) ilaa lix (6) sano oo xarig ah iyo ganaax lacageed ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.
3. Waxaa mamnuuc ah oo aan la ogolayn in goobta codbixinta laga ololeeyo, codbixiyeyaasha loo cago jugleeyo, hanjabo, laga hor istaago in ay coddeeyan ama khalkhal la galiyo habsami u socodka doorashooyinka ee goobta.

dayan Africa

4. Qof kasta oo isku dayda ama sameeya danbiyada ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan waxaa ay gashay fal-dembiyeed waxaayna mutaysanaysaa ciqaab xarig oo aan ka yarayn hal (1) sano iyo qaddar ganaax lacageed ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.
5. Hawl-wadeen kasta ee GMDQ oo si bareer ah u gudan waaya waajibaadkiisa shaqo ama isku daya ama sameeya in uu wax ka beddelo natiijada doorashooyinka ee uu gacanta ku hayo, waxyeeleeya waraaqaha codbixinta ama agabka kale ee goobta codbixinta waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa xarig aan ka yarayn sanad (1) ilaa saddex (3) sano iyo ganaax lacageed oo ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.

## Qodobka 52-aad:
## Dhawrista Sharciga

1. Dhawrista iyo ku dhaqanka sharcigani waa waajib saaran dhammaan shacabka Soomaaliyeed iyo hay'addaha Dowladda ee sida gaarka ah ay u khuseeyo howlaha doorashada.
2. Ku dhaqan la'aanta iyo ku xadgudubka sharcigan waxaa lagu mutaysanayaa ciqaabaha ku xusan sharcigan iyo xeerka ciqaabta ee dalka.
3. GMDQ waxaa waajib ku ah meelmarinta iyo ku dhaqanka qodobada sharcigan.

## Qodobka 53-aad:
## Dib-u-dhaca Doorashooyinka

1. Muddada xilhaynta Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo madaxda la doortay wuxuu shacabku u idmaday muddo cayiman oo ku xadiddan Qodobbada 60aad iyo 91aad ee Dastuurka;
2. GMDQ waa in ay labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo wadajira hor keenaan jadwalka, xogta iyo waxyaabaha lagama-maarmaanka u ah qabsoomidda doorashada muddada ku xusan Qodobka 13aad Faqradiisa 3aad ee Sharciga;
3. Haddii GMDQ ay awoodi waayaan soo gudbinta qorshaha qabsoomidda doorashooyinka muddada ku xusan Qodobka 13 (3) ee Sharcigan, ama ay ku dhawaaqan in aysan qaban karin doorashada, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa fadhi wadajir ah go'aan ku soo saaraya.

## Qodobka 54-aad:
## Sugidda Amniga

1. Qof kasta oo Soomaali ah waxaa waajib ku ah in ay ka qeybqaataan sugidda amniga xilliga doorashooyinka.
2. Sugidda amniga waxaa si gaar ah uga mas'uul ah Ciidanka Booliska heer Fedeeraal iyo heer Dowlad Gobolleed.
3. Hay'addaha mas'uuliyadda sugidda amniga leh ee ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan waxaa waajib ku ah in ay awaamiirta GMDQ ku shaqeeyaan xilliga doorashooyinka lagu jiro.

## Qodobka 55-aad:
## Xaaladaha Anshax Marinta

1. Sida uu tilmaamayo qodobka 14aad ee Sharciga dhisidda GMDQ (Sharci Lr. 04 ee 2015) iyo qodobka 6aad ee sharcigan, GMDQ waxay ka mas'uulyihiin taabagalinta doorashooyinka iyo habsami u socodka doorashooyinka, sidaa daraadeed waxay awood u leeyihiin in ay anshax mariyaan qof kasta oo ku kaca gef maamul ama ku xadgudba doorashooyinka iyo xeerarka doorashooyinka wakhtiga doorashooyinka lagu jiro.
2. Anshax marinta GMDQ ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkani waxaay noqon kartaa:

dayan Africa

a. Canaan af ah;
b. Digniin qoraal ah;
c. Ganaax lacageed.

3. Xisbi kasta oo ku xadgudba nidaamka doorashooyinka iyo shuruucdeeda, waxaa la marinayaa xeerarka anshaxmarinta axsaabta oo ay soo saaraan GMDQ si waafaqsan qodobka 56aad ee Sharcigan.
4. GMDQ wuxuu tallaabooyin ku habboon oo anshaxmarin ah ka qaadayaa hawl-wadeenada iyo shaqaalaha doorashooyinka ee fulinwaaya sharciga ama jabiya qodobada shuruucda doorashooyinka.
5. Xadgudubyada waaweyn ee wax u dhimaya habsami u socodka nidaamka doorashooyinka, waxay GMDQ amrayaan in la soo qabto lana xiro cid kasta oo ku lug leh sharcigana la horkeeno.

**Qodobka 56-aad:**
**Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaasha**

1. GMDQ wuxuu awood u leeyahay in uu curiyo soona saaro xeer-nidaamiyayaal, habraacyo iyo hageyaal si ay u dabaqaan una dhaqan galiyaan qodobada sharcigan, kuwaas oo ay ka mid yihiin.
   a. Xeer-nidaamiyaha Anshaxa Doorashooyinka;
   b. Xeer-nidaamiyaha hab-dhaqanka shaqaalaha iyo hawl-wadeenada doorashooyinka;
   c. Xeer-nidaamiyaha habraaca Samaynta Xafiisyo Doorasho iyo Astaynta Goobaha Codbixinta
   d. Xeer-nidaamiyaha diiwaangelinta codbixiyaasha wixii aan sharcigan lagu sheegin,
   e. Xeer-nidaamiyaha habraaca Tabeelayaasha iyo halku-dhigyada;
   f. Xeer-nidaamiyaha hab-dhaqanka saxaafada ee xilliga doorashooyinka;
   g. Xeer-nidaamiyaha habraaca Waraaqaha Codbixinta.
   h. Xeer-nidaamiyaha habraaca hawlaha tirinta codadka haddii loo baahdo;
   i. Xeer-nidaamiyaha korjoogtaynta Doorashada; iyo
   j. Xeer-nidaamiyaha habraaca jadwaleynta ololaha doorashooyinka ee axsaabta.
2. GMDQ waxaa ay soo saari karaan buug yareyaal iyo hageyaal lagu wacygalinayo codbixiyeyaasha iyo dadweynaha Soomaaliyeed guud ahaan oo lagu hirgalinayo laguna faahfaahinayo sharcigan.
3. Sharcigaan ayaa aasaas u ah dhammaan xeer nidaamiyeyaasha, xeerarka anshaxa, hageyaasha iyo buugyare-yaasha doorashooyinka la xiriira, mana ka hor imaan karaan.

dawan Africa

**Qodobka 57-aad:**
**Baabi'in**

Waxaa la baabi'iyay sharci ama xeer kasta oo Doorasho oo ka hor-imaanaya sharcigaan.

**Qodobka 58-aad:**
**Dhaqan-galka Sharciga**

Sharcigan waxaa uu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan goleyaasha Baarlamaanka Federaalka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyana saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.